



**Jamhuuriyada Somaliland**  
**Golaha Wakiilada JSL**



**Warbixinta**

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 25<sup>aad</sup>**

*09 August 2014 to 30 September 2014*

***November 2014***

[Waaxda Hadal Qoraalka](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 25<sup>aad</sup>](#)

**Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

**Ujeedo:- Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 25<sup>aad</sup>**

*Mudanayaal*

Si aynu u qorshayno hawlaha **kal-fadhiga 26<sup>aad</sup>** ee Golaha Wakiilada una dardar galino una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 25<sup>aad</sup> oo dhamaystiran si aad u xasuusataan wax yaabihii inoo qabsoomay iyo wixii aan inoo qabsoomin.

**Ajandaha Kalfadhiga 25<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada.**

09/08/2014

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Xogogaal u noqoshada Xalada Dalka
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada aa u marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Wax-kabadalka/Kaabista Xeerka Diiwaan galinta Codbixiyaasha	Wax ka badal/kaabis	Xukumada
2.	Xeerka Hay,adda Tayada	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudida degaanka
3.	Xeerka Nidaamka Xukuumadda	Warbixin W.Madaxtooyada	Gudidda Joogtada
4.	Xeerka ka Gacansiga Hawlaha BangiyadaJSL	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Gole Weynaha
5.	Xeerka ilaalinta Duurjoogta iyo keymaha	Akhriska 1aad	Gudidda Degaanka
6.	Xeerka a Hay'adda HIV	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Adho-Committee
7.	Xeer hoosadka Golaha Wakiilda	Dib u eegisa	Xoghayaha Guud
8.	Xeerka Duulista Hawada	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Arrimaha Bulshada

9.	Xeerka Waxbarashada Qaranka JSL	Warbixinta W.Waxbarashada	Gudidda Arrimaha bulshada
10.	Xeerka Saxaafada	Akhriska laad	Gudidda Arrimaha Bulshada
11.	Xeerka La dagaalanka Argaxisada	Warbixinta W.Arrimaha Gudhaa	Gudidda Arrimaha Gudaha
12.	Xeerka Caasimada	Mooshin	Gole Waynaha

4. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
5. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
6. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
7. Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqda ee aanu saxeexin.
8. Iyo Wixii kale ee soo kordha.

## 1. Kal-fadhigii 25<sup>aad</sup>

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	25 <sup>aad</sup>	09/08/2014	30/09/2014

Kal-fadhigan oo Goluhu qabtey hawlo aad muhiimaa ay ka mid ahaayeen Ansixinta Xeerarka Komishanka HIV/AIDSka, Xeerka Hay'adda Dhowrista Tayda iyo wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha iyo Ansixinta Xubno ka mid ah Masuuliyiinta Qaran, halkan ayaanu ku soo bandhigeynaa Wax qabadkii Kal-fadhiga 25<sup>aad</sup> oo dhameysitiran si aynu u dardargalino kal-fadhiga 26<sup>aad</sup>.

## 2. Xeerarka Goluhu ka doodey:-

No	Magaca Xeerka	Watkhtiga laga doodey
1.	Xeerka Ganacsiga Banaanka	23/08/2014
2.	Xeerka Hay'adda dhowrista Tayada	15-14/09/2014
3.	Wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 23/2007	20-27/09/2014

### 3. Xeerarka Goluhu Ansixiyey

No	Xeerka	Taariikhda	Loo gudbay
1.	Xeerka Komishanka HIV/AIDSka	--/09/2014	Guurtida
2.	Xeerka Hay'adda Dhowrista Tayada	-----	Guurtida
3.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 23/2007	30/09/2014	Guurtida

### 4. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay



<u>No.</u>	<u>Magaca Masuulka</u>	<u>Xilka</u>	<u>Taarikhda</u>
1.	Md. Muuse Qaasim Cumar	Wasiirka Ganacsiga	18/08/2014
2.	Md. Cali Maxamed Cilmi	Wasiir ku-xigeenka Amniga	18/08/2014
3.	Md. C/kariim Axmed Mooge	Wasiir ku-xigeenka Kaluumeysiga	18/08/2014
4.	Md. Cali Xaamud Jibriil	Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi baadhista iyo Technologyga	30/08/2014

## 5. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey.



No	Masuulka	Warbixinta
1.	Md. Xirsi X. Cali Wasiirka Madaxtooyada	Warbixinta Xeerka Nidaamka Xumuumada.
2.	Md. Cali Maxamed Warancade Wasiirka Arrimaha Gudaha	Xaalada Guud ee arrimaha Gudaha
3.	Md. Axmed X. Cali Cadami Wasiirka W. Gaashaandhiga	Xaalada Amniga iyo Difaac ee Dalka
4.	Green Caucus Group	Warbixinta Xeerka Duur-jooogta

## 2. Xeerarka Gudiyadu Gacanta ku Hayaan

No.	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
1.	<b>Guddidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Midaynta Cashuuraha</li> <li>• Xeerka Caymiska Qaranka</li> <li>• Xeerka Law of Establishment of Somaliland Agency</li> </ul>
2.	<b>Guddidda Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud</li> <li>• Xeerka Kufsiga (rape act)</li> </ul>
3.	<b>Guddidda Joogtada iyo Anshaxa</b>

	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Nidaamka Xukuumada</li> <li>• Xeerka Maamuuska Mudanayaasha</li> <li>• Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka</li> </ul>
<b>4.</b>	<b>Guddidda Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose</li> <li>• Xeerka Saxaafada</li> <li>• Xeerka Ciyaaraha</li> <li>• Xeerka Duulista Madaniga ah</li> <li>• Xeerka Waxbarashada</li> </ul>
<b>5.</b>	<b>Guddidda Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Argagixisada</li> <li>• Wax kabadelka iyo kaabista Xeerka Diwaangalinta Codbixiyayaasha</li> </ul>
<b>6.</b>	<b>Guddidda khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha</li> </ul>

## **8. Waxqabadka Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada JSL**

### **Gudidda Joogtada iyo Anshaxa**

Waxay Gudidda Joogtada iyo Anshaxa Golaha Wakiiladu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda shaqo ee uu siiyay Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu ay Golaha uga soo talo-bixisay Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha, Cilmibaadhista iyo Technology **Md.Cali Xaamud Jibriil** Iyadoo Golaha u soo jeedisay in Xilkaa loo ansixiyo, isla markaana Goluhu Wasiirka u ansixiyay Xilkaa Madaxweynuhu u soo magacaabay.

### **Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka**

Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Golaha wakiilada oo aheyd Gudidda uga shaqada badan Gudiyada Golaha isla markaana ku talaabsatey Wax-qabad weyn tan intii la isku shaandheeyay Gudiyada Golaha, waxayna kulamo Xogwaraysi ah la qaateen masuuliyiin badan oo ka tirsan Hay'addaha iyo laamaha kala duwan ee Qaranka JSL.



Hadaba Gudiddu iyadoo gudanaysa Waajibaadkeeda sharcigu siiyay waxay kulamadan ayay inta badan Gudidu ku waydiinayeen masuuliyiinta su'aalo ku saabsan shaqada ay qaranka u hayaan gaar ahaana nidaamkooda Maamul, waxqabad, wada shaqayn iyo sida ay u maamulaan Hantida Hay'addahaasi gacanta ku hayso ama soo mara ha ahaato dhaqaale ama hantida kale ee

aasaasiga ahba ee.

Kulamadan ayaa intooda badan ahaa qaar u dhacay sidii loogu talo galay isla markaana ay maamulka iyo masuuliyiinta Hay'addahaasi ay Gudidda ula shaqeeyeen ugagana xog-warameen sidii ugu fiicnayd.

**Gudidu waxay kulamada la qaadatay masuuliyiintan hoos ku qoran:-**

1. Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Biyaha JSL.
2. Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha JSL.
3. Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha.
4. Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda maamul wanaaga iyo madaxda Hay'addaas.
5. Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada
6. Gudoomiyaha Madbacada Qaranka
7. Gudoomiyaha Gudida Qandaraasyada JSL
8. Gudoomiyaha Baanka Dhexe ee JSL
9. Agaasimaha iyo Maamulka wasaarada Caafimaadka JSL
10. Mayorka Caasimada JSL
11. Mayorka Degmada Gabilay
12. Xisaabiyaha Guud
13. Madaxa ugu sareeya Hay'adda UNDP Xafiiska Somaliland
14. madaxa ugu sareeya hay'adda UNICEF Xafiiska Somaliland
15. madaxa ugu sareeya hay'adda WHO Xafiiska Somaliland
16. Gudidu waxay kale oo kormeer ku mareen dhawr Haayadood oo ka Tirsan Xukuumada.

Waxay sidoo kale Gudidu kormeer xaqiiqo raadin ah ku mareen Goboladda iyo Degmooyinka Dalka oo kala ah Gobolka Awdal, Gabiley, Saaxil iyo Togdheer, waxayna intii ay ku jireen safarkan Gobolada ay Kulamo kala la yeesheen, Badhasaabada Goboladaa, Isuduwayaasha iyo laamaha Hay'addaha Dawladu Gobolada ku leeyihiin, Golayaasha Deegaanka iyo Maamulada ilaha Dhaqaalaha sida Kastamada, Dekada Berbera iyo Maamulka Haamaha Shidaalka Berbera.





Iyadoo ay tahay markii ugu horaysay ee ay Gudiddu sidan xawliga ah u shaqeeyaan waxay kal-fadhigan Golaha Horkeenayaan warbixino ku saabsan Wixii ka soo baxay iyo Waxay kala kulmeen kulamadii ay masuuliyiintan la sameeyeen iyo Kormeerkoodii Gobolada Dalka.

Warbixinahan ay Gudiddu soo wado ayaa guud ahaan saamayn taban oo xaga horumarka ah ku yeelan doona Golaha iyo guud ahaan Laamaha kala duwan ee Qaranka JSL.

### **Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyada**

Waxay Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada u qaabilsan Golaha Wakiiladu iyadoo gudaneysa waajibaadkeeda shaqo ee uu siiyay Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu ay Golaha uga soo talo-bixisay Wasiirka Wasaarada Ganacsiga **Md.Muuse Qaasim Cumar** Iyadoo Golaha u soo jeedisay in Xilkaa loo ansixiyo Wasiirka.

**24/09/2014** Gudiddu waxay safar shaqo ugu ambabaxay Gudida Dhaqaalaha Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada JSL.

Gudidan oo Golaha u qaabilsan la xisaabtanka laamaha dawladda ee ka shaqeeya maaliyadda ganacsiga iyo dhaqaalaha ayaa waxa uu safarkoodani ku adaana u guurkalka miisaaniyadda qaranka ee 2015 taas oo golaha madaxweynuhu u soo gudbiyey.



Gudidan oo uu horkacayey gudomiyaha gudida dhaqaalaha **Md Cumar Axmed Saleban (Sanweyne)** isla markaana uu safarkan ku wehelinaayey gudida xoghayaha guud ee Goluhu, isago safrakani qaatey mudo 2 cisho ah Waxay Gudidu kulamo la qaadatay:-

- Masuuliyiinta Haamaha Shidaalka
- Maareeyaha Kastamka Berbera
- Maareeyaha iyo Maamulka Dekada Berbera
- Iyo Maxjarka AL-jaabiri

### **Guddida Kheyraadka dabiicga ah iyo Xoolaha**

Waxay Gudidda Kheyraadka Dabiiciga ah iyo Xoolaha u qaabislan Golaha Wakiiladu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda shaqo ee uu siiyay Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu ay Golaha uga soo talo-bixisay Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Kaluumeysiga **Md.C/kariim Axmed Mooga** Iyadoo Golaha u soo jeedisay in Xilkaa loo ansixiyo Wasiirka, Goluhu wuxuu Xilkaa Wasiir ku-xigeenimo u ansixiyay Masuulkaas.

### **Guddida Arrimaha Gudaha**

- ✚ Waxay Gudidda Arrimaha Gudaha u qaabislan Golaha Wakiiladu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda shaqo ee uu siiyay Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu ay Golaha uga soo talo-bixisay Wasiir ku-xigeenka Amniga **Md.Cali Maxamed Cilmi** Iyadoo Golaha u soo jeedisay in Xilkaa loo ansixiyo Wasiirka.
- ✚ Sidoo kale waxay Gudidda Arrimaha Gudaha Goleweynaha u soo gudbisey intii lagu jirey kal-fadhigii 25aad Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 23/2007 oo Xukuumaduna Golaha u soo gudbisey, waxay Gudiddu ka dib markii ay ka soo shaqeeyeen Xeerka wax ka badal iyo kaabisna ay ku soo sameeyeen ay warbixin ka siiyeen Golaha una soo gudbiyeen, Goluhuna isago gudanaya Wajibaadkiisa dood dheer ka dib uu Goluhu intuu wax ka badal iyo kaabis ku sameeyay Ansixiyay Xeerkaa isla markaana u gudbiyay Golaha Guurtida.
- ✚ Waxay Gudiddu kulan la yeelatay Gudidda Komishanka Doorashooyinka cusub, Gudiddaas oo ka kooban 7 xubnood oo ay soo kala magacaabeen Madaxweynaha oo soo magacaabay 3 xubnood, 2 xubnood oo Guurtidu soo

magacawday iyo 2 xubnood oo soo kala magacaabeen labada Xisbi Mucaarad, ka dibna Madaxweynuhu Degreeto Golaha ugu soo wada gudbiyay sida uu dhigayo Sharcigu.



Guddidaas oo Marka Golaha loo soo gudbiyo sida sharcigu dhigayo lagu wareejiyo Gudidda Arrimaha Gudaha u qaabilsan Golaha iyadoo xubin kasta hubineysa inay buuxineyso shuruudaha Xeerku dhigayo ee looga baahan yahay Xubinta ka mid noqoneysa Komishanka Doorashooyinka.

Sidaa darteed Kulamadan ay Gudiddu la yeelatey xubnaha cusub ee Komishanka ka dib waxay Golaha u soo gudbisiey in 7 xubnood ee Komishanku buuxiyeen Shuruudihii isla markaana Goluhu ansixiyo kal-fadhigan iminka bilaabmey ee Kal-fadhiga 26aad ee Golaha Wakiilada JSL.

### **Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo xuquuqal insaanka.**

**22/09/2014** ayaa lagu wareejiyay Guddida Dastuurka, Cadaalada, Garsoorka iyo Xuquuqal Insaanka ee Golaha wakiilada Xeerka kufsiga (rape act) oo si wadajir ah ay usoo diyaariyeen Guddida Health Caucus ayna kaqayb qaateen ururada Bulshada rayidka ah oo ay ka mid ahaayeen:-

- Komishanka xuquuqal insaanka,
- SWA,
- CCPRS,
- Nagaad,
- Jamaacada hargeisa,

- Baahi koob
- iyo waabo.



Xeerkan oo in mudo ah ay hawshiisu soo socotay ayaa waxaa saaka si rasmi ah soo jeedin loogu sameeyay xarunta Golaha Wakiilada kulan ay ka soo qayb galeen dhamaan dhinacyadii kasoo qayb qaatay Xeerkaas iyo sidoo kale Guddida cadaalada oo maanta si rasmi loogu wareejiyay Xeerka, iyadoo dhinacyada oo dhami ka dhawaajiyeen in Xeerkani hadii uu dhaqan galo uu noqon doono mid si wayn uga qayb qaata yaraynta ama joojinta kufsiga.

### **Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta**

Kulamadii ay yeelatey Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta u qaabilsan Golaha Wakiilada JSL iyadoo Gudaneysa Waajibaadkeeda shaqo ee Xeer-hoosaadka iyo Dastuurku siiyay, waxay intii lagu jirey kal-fadhiga 25<sup>aad</sup> iyo fasixii ka dambeeyay waxay kala ahaayeen sidan hoose:-

- **Salaasa, 02/09/2014,** Gudidda waxay Kulan la yeelatey Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha, Dhalinyarada iyo Dalxiiska **Md. Cali Siciid Reygal,** kulankaas oo Gudiddu Wasiirka kaga xog-wareysteen Hawlaha Shaqo ee Wasaaradiisa iyo waxyaabaha u qorsheysan su'aalano ka weyddiyeen Mudanayaasha Gudiddu.
- **Sabti 06/09/2014,** Gudida Arrimaha Bulshada iyo Diintu iyadoo Gudaneysa Waajibaadkeeda shaqo ee ay Golaha u qaabilsan tahay waxay kulan la yeelatey Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigalinta **Md.**

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 25<sup>aad</sup>**

**C/laahi Cakuse**, Wasaaradaas oo ka mid ah Wasaaradaha wada shaqeyntu ka dhaxeeyso Gudidda Arrimaha Bulshada ayay ku xog-wareysteen Wasiirka isla markaana wasiirku warbixin ka siiyay Gudidda sida Hawlaha Shaqo ee Wasaaradiisu u socdaan iyo sidey u shaqeeyaan, gabo-gabadiina Mudanayaasha Gudiddu su'aalo shaqadiisa la xidhiidha ku weydiyeen Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigalinta.

## **9. Gudiyada Gaar ah (Adhoc Committee)**

Gudidda Gaar ah (ad hoc committee) loo saarey Xeerka Ganacsiga Baananka oo goluhu ka dooday 23/08/2014, Mudanayaasha loo saarey waxay ahaayeen:-

1. Md. Siciid Maxamed Cilmi.
2. Md. Ibraahim Caraale Cabdi
3. Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf
4. Md. Maxamud Axmed Obsiye
5. Md. Maxamed Xuseen X. Ciise

## **10. Aqoon korodhsiyo, Workshops iyo Kormeero.**

Waxaa 11-12 October 2014 loo qabtay tababar socday laba cisho shaqaalaha Golaha Wakiilada ee Gobolada dalka iyagoo ku baranayey casharo la xidhiidha waajibaadkooda iyo mas'uuliyadooda shaqo.

Tababarkan ayaa ah kii ugu horeeyey ee ay qaateen tan iyo markii ay si rasmi ah ugu hawlgaleen xafiisyadda gobolada ee dalka, waxaa tababarkan bixinayay khabiir ku xeel dheer arrimaha baarlamaanka **Mrs Soulef** iyo qaar ka tirsan mas'uuliyiinta sarsare ee shaqaalaha Golaha Wakiilada oo ugu horeeyo Xoghaya Guud **Mr Abdirisq Siciid Ayanle**, Agaasimaha Qorshaynta Mudane Abdinasir Osman Mohamoud iyo lataliyaha Sharciga Mudane Mustafe Mohamed H. Dahir.



Shaqaalaha Goboladu waxay ku barten casharo faa'iido leh oo la xidhiidha shaqada Parlamaanka (Parliament business), mudadii labada cisho ah uu socday ayaa waxaa uu u dhacaayay si habsami leh waxaana ka muuqatay shaqaalaha diyaargarow fiican.

Tababarkan oo gacan wayn ka gaysatay suurto galnimadiisa iyo qabsoomidaba hay'adda UNDP, waxaana Shaqaalaha markuu tababarkii u dhamaadey la siiyay Shahaadooyin uu Gundoonsiiyay Xoghaye ku-xigeenka Mr. Jamaal Jaamac Jiir.

## **11. Wufuudii Golaha Timi.**

Waxa uu kulan ku dhexmaray Xarunta Golaha Wakiilada Shirgudoonka Golaha Wakiilada oo uu weheliyo Xoghayaha Guud ee Goluhu iyo wafti uu hogaaminayo Madaxa UN-ka Hawlgalka Somalia iyo Somaliland Nicolas kay.

Kulankan oo ahaa mid arimo farabadan laysla soo qaaday ayaa waxaa furay shirka Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane C/raxman maxamed C/laahi (Cirro) kaas oo kala hadlay u qaybsanaha arimo farabadan oo ay ka mid ahaayeen.

Ugu horayn waxa uu Guddoomiyuhu kala hadlay Qadiyada Somaliland isaga oo carabka ku adkeeyay in aan marnaba arinta Somaliland Madaxbanaanideedu ay tahay mid aan inaba wax gor-gortan laga galayn.



Waxa kale oo uu Gudoomiyuhu u waramay in Somaliland ay hayso wadada horumarka iyo Dimuquraadiyanta taas oo loo baahanyahay in kor loo sii qaado.

Waxa sidoo kale uu sheegay in ay jiraan arimo u baahan in wax laga qabto oo Somaliland hada culays wayn ku ah taas oo ay kamid tahay shaqo la'aanta dhaliyarada Somaliland oo badankoodu aan maanta wax shaqo ah heli Karin.

Xaga nabadgelyada ayuu sidoo kale Gudoomiyuhu sheegay in ay u baahanyihiin in UN-tu wax kala qabato, sidoo kale arinta doorashooyinka ayuu sheegay Gudoomiyuhu in ay Somaliland ka caawiyaan oo ay u soo diraan Goobjoogayaal. Waxa kale oo uu ka waramay Gudoomiyuhu in Xeerkaa diiwaangelinta ay ansixiyeen Golaha wasiiradu iyadoo dhawaana la horkeeni doono Goleyaasha sharci dejinta oo lagu dhamayn doono mudo Saddex todobaad ah.

Dhinaca kale waxaa uu Gudoomiyuhu kala hadlay in khilaafaadka Xaga Xuduudaha ee ka dhaxeeya Somaliland iyo wadamada jaarka ah, uu aaminsanyahay in lagu dhameeyo sida ugu wanaagsan ee wada hadal ah. Sidoo kale waxa uu Gudoomiyuhu ku u cadeeyay in ay taageersanyihiin wada hadalada Somaliland iyo Somalia oo ilaa hada arimaha laga gaadhay ay ka mid tahay arinta Xaga hawada taas oo hada dawlada Somalia ay ka baxday taas oo uu Gudoomiyuhu sheegay in loo baahanyahay in la hirgaliyo, si ay wada hadaladu hore ugu sii socdaan. Iyo in loo baahanyahay in la balaadhiyo kasoo qayb galayaasha shirarka sidii ay markii horeba ku bilaabmeen taas oo ay kasoo qayb gali jireen wadamo kale meesha shirka lagu qabanayo.

Intaas kadib waxaa isna hadalka la wareegay Gudoomiye ku xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada mudane Cali yusuf Axmed oo isna ka waramay Qadiyada Somaliland iyo sida ay lama taabtaanka u tahay, waxa uu sheegay in waxyaalaha ay Somaliland ay nabadgalyada u tahay ay ka mid tahay inay maanta Xoriyada buuxda haysato oo ay ka go'day Somalia, kadib markii midawgii Somalia ay Somaliland ku khasaartay ee ay kala kulantay Xasuuq.

Sidoo kale waxaa uu Gudoomiye Cali yusuf tusaale usoo qaatay in ay maanta jiraan wadamo si nabadgelyo ah u kala go'ay sida wadankii la odhan jiray Checkslovakia oo hada noqday Check Republic iyo Slovakia sida la arkayna ay hada ka wanaagsanaadeen markii laysku jiray, waxa kale oo uu Gudoomiyuhu soo qaatay in aanay suuragal ahayn in dadkii isku qoomiyad ahiba ay hal dal yeeshaan taasna aanay ahayn wax suuro galaya.

Intaas kadiba waxaa hadalka lagu wareejiyay Madaxa hawlgalka Qaramada midoobay ee Somalia/Somaliland kaas oo ugu horayn sheegay in Xafiiskiisu uu leeyahay laba qaybood qaybta siyaasada iyo qayb bini'aadam nimo, iyadoo uu sheegay in qaybta siyaasadu aanay ka shaqaynin Somaliland, balse UN-tu ay Somaliland joogtay mudo aad u dheer isla markaana ay Somaliland kala shaqaynaysay arimaha bini'aadamnimada.

Waxa uu sheegay in ANSOM ay leedahay qaybo faa'iido u yeelankara Somaliland oo ay doonayaan inay kala shaqeeyaan sida:-

- Arimaha Gender-ka
- Saxaafada
- Arimaha Bini'aadamnimada
- Dhismaha hay'addaha Dawladeed
- Nabadgelyada
- Cadaalada
- Police-ka

Sidoo kale waxa uu Nicolas kay ku aamaaney Somaliland nidaamka dimuquraadiyadeed ee ka jira kaas oo uu sheegay inay tusaale u tahay wadamo farabadan oo ay somaliyana ku jirto.



Waxa uu sheegay inay dhiirigalinayaan wadahadalada Somaliland iyo Somalia iyagoo ku dadaali doonaan in arimaha kasoo baxa si la fuliyo. Balse uu isagu usoo diran doono dad uga soo warama xafiiskiisa arimah doorashada.

Arinta xaga Goobjoogayaasha wax uu sheegay in xafiiskiisani aanu go'aamin Karin xafiiskiisu balse ay tahay in Xubnaha Qaramada midoobay ay ogolaadaan.

Sidoo kale waxa uu sheegay inay dhiirigalinayaa wadahadalada Turkiga dhawaan in dhakhso loo bilaabana ay ka shaqaynayaan isagoo sheegay in arinta Gudoomiyuhu ka dhawaajiyay ee ah in la balaadhiyo goob joogayaashana laga hadli doono.

## **12. Khilaafkii Golaha Ka dhacey, (Mahadho).**

Waxaa intii lagu jirey Fasaxa Kal-fadhiga Golaha ee u dhaxeysay 30 september ilaa 11 November ka dhashay khilaaf salka ku hayay Wax ka badalkii iyo Kaabistii Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 37/2007 oo Goluhu ansixiyay, ka dib markii Xeerkaa loo gudbiyay Golaha Guurtida ayay Mudanayaasha Muxaafidka ee Xisbiga Kulmiye ee Golaha Wakiiladu sheegeen in Xeerka wax ka badal lagu sameeyay oo aanu aheyn sidii lagu ansixiyay.

Intaa ka dib, waxay Furitaaankii Kal-fadhigan 26<sup>aad</sup> ay mudanayaasha Muxaafiku ay Moshin Xil ka qaadis ah ku soo ogeen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi**, waxayna furitaaankii kal-fadhiga 11/11/2014 Golaha la horkeenay Moshinkaas iyadoo Golaha la keenay Ciidamo badan xildhibaanada Muxaafidkuna isugu yimaadeen Fadhiga inay Cod u qaadaan Moshinka, halka Xildhibaanada Mucaaridku aaney ka xaadirin fadhigaa.

Iyadoo Khilaakii ka dhashey mooshinkaasi uu sababay inay mudaharaado ka dhacaan Magaalooyinka qaar, sidoo kalena waxaa xarunta CIDda lagu xidhay 5 xildhibaan oo ka tirsan Xildhibaanada Mucaaradka ee Golaha Wakiilada iyo Xoghayihii Guud ee Golaha oo isagana Saldhiga dhexe lagu xidhay.

Intaa ka dib intaanu furmin fadhigii loogu balansanaa Mooshinka Xildhibaanada Muxaafidku ay diyaar ku yihiin Xarunta Golaha ayaa waxaa soo dhex-galey Golaha Guurtida oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Guurtida **Md. Saleebaan Maxamuud Aadan**, waxay ka dalbadeen Mudanayaasha iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> ee Golaha oo fadhiga Gudoominayay inay fadhiga dib ugu dhigaan xaaladana ay iyagu dhex-dhexaadiyaan, wada hadal ka dibna waxay ka aqbaleen Codsiga Golaha Guurtida.

Sidoo kale waxaa maalintaa ka dhacey Magaalooyinka Burco iyo Ceergaabo Mudaharaado, iyadoo Magaalaada Hargeysa Lagu Xidh-Xidhay Koox Xildhibaano oo Garabka Gudoomiyaha Golaha Xildhibaanadaas oo ah 5 xildhibaan waxay kala ahaayeen, Md. Ibraahim Mahdi Buubaa, Md. Bashiir Tukaale, Md. Maxamed Saalax Cige iyo Md. Siciid Cilmi Rooble, iyadoo Habeenimadii ka horeysayna Saldhiga Dhexe ee Magaalda Hargeysa lagu xidhay Xoghayihii Guud ee Golaha Wakiilada Md. C/risaaq Siciid AYaanle oo mudo 10 Cisho ah ku xidhnaa Saldhigaa, markii dambena la sii daayay iyadoo aan la sheegay wax dambiya oo lagu xidhay oo wax lagu helay toona.

Golaha Guurtida oo ah Gole dhaqan oo inta badan ku suntan daminta iyo maareynta khilaafyada Siyaasadeed iyo kuwa kaleba waxay kulamo la yeesheen labada dhinaca ee Golaha Wakiilada oo khilaafku ka dhex-jirey, waxay Gudi u saareen ka 14 xildhibaan iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Guurtida, waxayna Golaha Guurtidu Go'aamadii ka soo baxay ka yeedhiyeen 22/11/2014 Xarunta Golaha Guurtida oo ka soo xaadireen Shir-gudoonka Golaha Wakiilada iyo Xildhibaanada Golahaasi, waxay ka dib ku dhawaaqidii qodobadii Dhex-dhexaadinta labada dhinacaba sheegeen inay aqbleen halkaana uu ku soo afgo'ay Khilaafkii Golaha Wakiiladu.

**Go'aanka G. Dhex-dhexaadinta khilaafka G/Wakiiladda:-** Guddiggii Golaha Guurtidu u xilsaaray dhex-dhexaadinta khilaafkii Golaha Wakiiladda JSL ee Maalintii 15/10/2014, kuna saabsanaa mooshinkii xil-ka qaadista Guddoomiyaha Golaha, ayay guddigu fadhigoodii ugu horeeyay ku samaysteen Ajandahoodii, waxayna labadii dhinac ku wargeliyeen cidii u matali lahayd dooddooda wada-hadalka, iyaga soo raacinaya warqadihii kalsooni-bixinta.

Intaas ka dib waxay Gudigu kulamo kala gaar -gaar ah la yeesheen labadii dhinac, kagana dhegaysteen dacwadahoodii af iyo qoraalba.

Hadaba, Guddigii Golaha Guurtiiddu u xilsaaray dhex-dhexaadinta khilaafkii Golaha Wakiiladdu:-

- Markii ay dhegaysteen dacwadaha dhicanyada khilaafku ka taagna.
- Markii ay arkeen, akhristeena qoraaladii kala duwanaa ee dhinacyadu u soo kala gudbiyeen.
- Markii ay darsen, lafa-gureen qoraaladii ay is waydaarsadeen labada Guddoomiye( Guurtidda & Wakiiladda), kuna saabsanaa mashruuca Xeer No:- 37/2007 ee wax-ka -bedelka iyo kaabista diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha iyo Muwaadidniinta.

- Markii ay guddigu yeesheen falanqayn iyo dood -dheer waxa u sugnaaday, yaqiina noqday Arrimahani:-

**B.** In Msharuuca Xeer No: 37/2007, ee wax-ka-bedelka iyo kaabista diiwaangelinta cod-bixiyayyaasha iyo Muwaadiniinta la geliyay khaladaad iyo laaxin qoddobada qaarkood markii loo soo Gudbinayay Golaha Guurtidda ee Codayntii Golaha Wakiiladda ka dib.

**T.** Curyaamin ku timid habsami-u-socodkii hawlaha Golaha oo ay ahayd in la ansixiyo Xubnihii Loo soo magacaabay Guddiga Doorashooyinka Qaranka, Ansixinta Miisaaniyadda 2015 IWM.

**J.** waxa caddatay in khilaafkaasi u dhaliyay khal-khal siyaasadeed, Nabad-galyo iyo jahawareer saameeyay Bulashada Reer soomaliland Gudo iyo Debadba, horseedayna deganansho la`aan iyo xasilooni-daro.

Sidaasi darteedna, Guddigu iyago xeeriyay, tix-galiyay maslaxadda guud ee Qaranka ee siyaasadeed, Nabad-galyo, dhaqaale, horumarin bulsho, geedi socodka hananka dimuqraadiyadda, hiigsiga Mustaqbalka fog ee reer soomaliland , midnimada iyo wada jirka shacabka.

#### **Waxay Go`aamiyeen qoddobaddani:-**

1. Waxa la laalay mooshinkii xil ka qaadista Guddoomiyah Golaha Wakiiladda, wadeena dhinicii uu hogaaminayay Guddoomiye ku-xigeenka laad ee Goluhu. Loomana soo jeedin karo mooshin ku saabsan xil ka qaadis, ila inta ka horaysa waqtiga uu xeerku u cayimay xil ka tegista musharaxa u tartamaya xilka madaxwayne.
2. Khaladadkii ku dhacay mashruucii xeer ee wax-ka-beddelka iyo kaabista xeer No 37/2007, kuna saabsanaa diiwaangelinta cod-bixiyayaasha iyo muwaadiniinta , mas`uuliyaddeeda u leeyahay Guddoomiyah Golaha Wakiiladdu, maadaama uu yahay mas`uulka ugu sareeya maamulka Golaha, leeyahana saxeexa gudbinta xeerarka IWM.
3. Waxa khalad ahayd baajintii ku timid kal-fadhigii aan caadiga ahayn ee 26/10/2014, looguna tala galay ansixintii xubnihii komishanka Qaranka iyo Miisaaniyadda 2015 IWM.
4. Waxa waajib ku ah Guddoomiyah Golaha wakiilada inuu xildhibaanada Golaha ku maamulo, kuna hoggaamiyo dhex-dhexaadnimo, isla markaasina uu meel-mariyo oo kaliya Go`aamadda uu Goluhu aqalbiyadda ku ansixiyo.

5. Xeerarka ka gudbaya Golaha Wakiiladda , ansixinta Mudanayaasha ka-dib, waa in shir-gudoonku iska hubiya Gudbinta ka hor.
6. Xubnaha Golaha Wakiiladdu, waa in ay wajibaadkooda si hagar la`aan ah u gutaan, dhamaanbana hawlaha muhiimka ee horyaala u socodsiiyaan si habsami ah oo xilkasnimo ku jirto.
7. Iyado la- tix-galinayo, lagana taxadirayo sii jiitan iyo khilaaf dambe oo sabab u noqda dib-u dhac ku yimaada doorashooyinka, waxa Golaha Guurtidda loo xilsaaray inuu xal-ahaan u saxo khaladaadkii mashruuca xeer ku dhacay, isla- markaana ka guto waajibaadkiisa dastuuriga ah. (Mashruucii xeer No 37/2007, ee wax-ka- beddelka iyo kaabista xeerkaa diiwaangalinta cod-bixiyaasha iyo muwaadinninta).
8. Xukuumadda wax xil-ka saaranyahay dhawrista xisaanadda mudanayaasha, mudanayashana waxa waajib ku ah in aanay sharciga gacanta ku qaadan, falagaraansahana ka fogaadaan, isla markaasina aanay bulshada u horseedin khal-khal iyo degaansho la`aan.
9. Ilaa inta laga gaadhayo waqtiga xeerku u jideeyay ololaha tartanka doorashooyinka, waxa ka reeban xisbiyadda Qaranka, wax u muuqan karaya olole iyo abbaabul dad-wayne, ahna shacaa`ir kasta oo muujiniya kaanbayn doorasho (Election Campaign).

Ugu dambayntii, waxan mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL ugu baaqaynaa in ay si xil-kasnimo iyo mudakarnimo ku jirto u gutaan mas`uuliyadda ay ummadda u hayaan, haybada Golahahoodan Ilaalilayan.

Waxan dhamaanba u rajaynaynaa Mudanayaasha Guull iyo in loo midoobo danta iyo maslaxada shacbiga reer soomaaliland.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---